



Bulshada qaaliga ah ee PPS ,

Saaka waxa aan ka xumaaday markaan arkay warkii ka soo baxay Yurubta Bari. Fikirkayga ayaa isla markiiba u soo jeestay ubadka noloshoodu si aan lago soo kabsan karin ayaa isu bedeli doonto. Isku dhacyadani waxay had iyo jeer ka soo saaraan kharashka ugu badan kuwa aan xakamayn dhacdooyinka. Wuxaan rajeynaya in dhammaan carruurtu ay nabad helaan marka uu dagaalku ka qarxo hareerahooda iyo in waalidiintu ay heli karaan xal oga badbaadiyaan caruurtood dhibaatada.

Dadkeena kala duwan ee dugsiyada PPS waxaa ku jira qoysaska ka soo jeeda Yukreeniyaan iyo Ruush labadaba. Ardaydan iyo dadka waaweyn waa qayb ka mid ah quruxda kala duwanaanshaha ee PPS. Dhammaantood waa xubno qiimo leh oo ka tirsan qoyska degmada. Maanta, qalbigeena wuxuu si gaar ah ula socdaa kuwa qaraabadooda weli ku sugaran waddankoodii, kuwaas oo laga yaabo inay saameyn ku yeeshaan dagaalka. Wuxaan rabaa in ay ogaadaan in aniga iyo dhammaan degmadeena aan taageerno wakhtigan adag.

Marka aan ku soconno xaaladdan nasiib-darrada ah, waxaa muhiim ah inaan si cad ula xiriirno ardaydeena si aan uga caawinno inay la qabsadaan culeysyada dagaalka.

- Iisticmaal hadallo fudud oo xog ogaal ah.
- Yaree wakhtiga aad ku bixinayso daawashada wararka.
- Ka fogow dooda kala qaybinta.
- Uu xaqijiij dareenka ardaygaaga.

Haddii loo baahdo caawimo dheeraad ah, waxaan kugu boorinaya inaad si buuxda uga faa'iidsato agabka aanu ka heli karno PPS, oo ay ku jirto la-talin. Fadlan la xiriir dugsigaaga.

Barayaal ahaan, mudnaantayada ugu sareysa had iyo jeer waa badbaadada iyo wanaagga ardaydeena. Wuxaan ahaan doonaa mid midaysan oo aan go'aansanay inaan siino, mar kasta oo loo baahdo, taageero ardayda laga yaabo inay la halgamayaan dareen ahaan hubanti la'aanta isku dhaca. Waxaa naga go'an dhammaan ardaydayada iyo dhammaan qoyska PPS.

Hor oo socod oo wadajir ah,

Guadalupe Guerrero